

## Table of Contents

Mashruuca 1aad: Jidka Ceerigaabo - Burco .....	1
Mashruuca 2aad: Dhismaha Biriishyada iyo Buundooyinka ee Jidka Ceerigaabo-Burco .....	3
Mashruuca 3aad: Dhamaystirka Dhismayaasha Waaxda Liisamda iyo Hay'ada Horumarinta.....	6
Mashruuca 4aad: Wadada Berbera Corridor.....	8
Mashruuca 5aad: Dhismaha Jidka Hargaysa Bypass .....	10
Mashruuca 6aad : Dhismaha iyo Dhameystirka Biriishka Camuud.....	12
Mashruuca 7aad: Dhismaha Jidka Lawyo-cado, Fardaha Ilaa Boorama.....	12
Mashruuca 8aad: Qaybtii Labaad ee Gaadiidka Loo keenay Mashruuca Jidka Ceerigaabo- Burco ee Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka JSL.....	13
Mashruuca 9aad: Jidka Hargeysa – Salaxley- Ina-Guuxaa .....	15
Mashruuca 10aad: Dhismaha iyo Qalabka Shaybaadhka Dhismayaasha iyo wadooyinka ee Qaranka .....	16
Mashruuca 11aad: Jidka Hargeysa - baligubadle.....	18
Mashruuca 12aad: Dhismaha Waddo 2 km ah oo isku Xidhi Doonta Hawdka Burco iyo Magaalada Burco.....	19
Mashruuca 13aad: Dhagax Dhiga Jidka Kala-Baydh ilaa Laascaanod.....	20
Mashruuca 14aad: Dhismaha Wadada isku Xidha Laas-Caanod iyo Madaarka Laas Caanod .....	22
Mashruuca 15aad: Dayactirka Waddooyinka Dalka.....	23
Mashruuca 16aad: Dayactirka Jidka Geel-doora ee Gobolka Sanaag .....	26
Mashruuca 17aad: Dhismaha Jidka Xargaga ilaa Dhumay .....	26
Mashruuca 18aad: Tababarka Injineerada Dawladaha Hoose ee Dalka. ....	27
Mashruuca 19aad: Diyaarinta Gaadiidka Wacyi- gelinta Covid19 .....	28
Mashruuca 20aad: Qalabaynta Hoostada Gaadiidka Hargeysa. ....	30
Mashruuca 21aad: Qalinjabinta Dufcadii Koowaad ee Darawalinta Dawladda iyo Bixinta Liisamada Cusub ee Dawladda .....	30
Mashruuca 22 aad: La Soo Wareegida Qalabka Daabacada iyo Liisamada Shirkada GTS.....	33
Mashruuca 23aad: Furitaanka Xafiiska Buugaagta iyo Bileedhada Lumey (One Stop Shop) .....	34
Mashruuca 24aad: Mishiinada Daabacada liisamada iyo Buugaagta ee Gobolada.....	35
Mashruuca 25aad: Hirgalinta Liisamada Bajaajta .....	36
Mashruuca 26aad: Qalinjabinta Dufcadii Labaad ee Darawalinta Dawladda.....	36
Mashruuca 28aad: Dib U Eegista iyo Wax-kabadalka Buuga Imtaxaanka Liisamada.....	40
Mashruuca 29aad: Dib U Habeynta Qaab Dhismeedka Hay'adda Horumarinta Waddoyinka.....	41
Mashruuca 30aad: Diwaan Gelinta Hantida Wasaarada .....	42

### **Mashruuca 1aad: Jidka Ceerigaabo - Burco**

Mashruucan Jidka Ceerigaabo-Burco waxa uu ka mid yahay mashaariicda ugu waa weyn ee Wasaaraddu Gacanta ku hayso, iyadoo kaashanaysa Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka Soomaliland isla markaana mudadii saddexda sannadood ee wasaaraddu gacanta ku haysay aad loo dardar galiyey si loo xaqiijiyo dhamaystirka waddo tayo leh laguna dhameeyo xiliga loogu talo gayey ee ku cad qorshaha Wasaaradda, iyo barnaamijka xisbiga Kulmiye.

Hadaba si loo gaadho faa'iidooyinkaa kala duwan ee ay leeyihiin wadooyinku, waxay hirgaliyeen Wasaaradda iyo Wakaaladda Horumarinta Wadooyinku 47KM oo laami ah Sanadkan 2020.

Jidka Ceerigaabo-Burco dhererkeedu wuxu dhan yahay 274 KM, waxa wasaarada gaadiidku ay la wareegtay iyada oo 94 KM oo waddo laami ahi dhammaystiran tahay.

Sannadkii 2018 wasaaraddu waxay dhammaystirtay 59 KM, halka sannadkan 2019, ay dhistay 42 KM, sanadkan 2020 waxaa la dhameystiray 47km taas oo wadar ahaan noqonaysa 148 KM, marka loo geeyo 94 Km hore u dhisna waa 242 Km.



**Jidka Ceerigaabo-Burco oo shaqadu ka socoto**





### **Mashruuca 2aad: Dhismaha Biriishyada iyo Buundooyinka ee Jidka Ceerigaabo-Burco**

Si loo bilaabo dhismaha Biriishyada iyo Buundooyinka Jidka Ceerigaabo-Burco, Wakaalada Wadooyinka Somaliland ee RDA waxay sanadkii 2017 heshiis la gashay shirkad laga leeyahay Wadanka Turkey oo la yidhaa BOSIN .

Inkastoo heshiiskii lala galay shirkada BOSIN uu si fiican u dhacay, hadana nasiib daro shirkadaasi way ku guuldaraysatay in shaqadii dhismaha Biriishyada iyo Buundooyinka ay bilowdo, waayo waxa jirtay maamul-xumo shirkadda dhexdeeda ka dhacay.

Hadaba si loo bilaabo oo loo dedejiyo dhismaha Biriishyada iyo Buundooyinka Ceerigaabo-Burco bilawgii sanadkan 2020, Wakaalada Horumarinta Wadooyinka Somaliland ee RDA waxay heshiis la gashay shirkad laga leeyahay Somaliland oo la yidhaa ADCON Co si waafaqsan Xeer L/r 82/2018 ee Qandarasyada Qaranka . si ay u keento qalabkii Biriishyada iyo Buundooyinka birta ah “Corrugated steel pipe culverts”, waxayna shirkadaasi keentay dhamaan qalabkii oo ah 52 Biriish iyo Buundo.

Kadib, markii qalabkii Biriishyada iyo Buundooyinka birta ah la keenay, Wakaalada Horumarinta Wadooyinka Somaliland ee RDA bishii August-2020 waxay heshiis kale la gashay shirkad laga

leeyahay Somaliland oo la yidhaa AL-NAFURA Co. si waafaqsan Xeer L/r 82/2018 ee Qandarasyada Qaranka, si ay u dhamaystirto dhismaha Biriishyada iyo Buundooyinka Ceerigaabo-Burco waxaana shirkadaa lagula heshiiyey inay dhiso **16** buundo oo ka mid ah 52 Biriish iyo Buundo ee wadada Ceerigaabo-Burco u baahan tahay.

Sidoo kale waxa la qorsheeyey in **36** Buundo ee hadhsan iyagana dhismahooda si dhakhso ah loogu bixiyo qandaraas oo la bilaabo inta aanu dhamaan sanadkan 2021.



*Markii la keenay Qalabka Buundooyinka iyo Biriishyada wadda Ceerigabo- Burco*



*Qaybo Ka mida Buundooyinka oo la dhisayo*



*Qaybo ka mida buundooyinka wadda Ceergabo- Burco oo la dhameystiray*

**Mashruuca 3aad: Dhamaystirka Dhismayaasha Waaxda Liisamda iyo Hay'ada Horumarinta** Wasaaradda Gaadiidka iyo H. jidadka iyo Hayada H. Waddooyinka waxay ku guulaysateen dhismaha iyo dhamaystirka labbo dhisme oo kala ah,

1. Dhismaha waaxda liisamada iyo buugaagta oo midaynaya shaqada wasaaradu bulshada u haysay meelna la iskugu keenay adeegyada kala duwan ee wasaaraddu qabato.
2. Dhismaha xarunta Hay'ada horumarinta waddooyinka

Hawshan oo la bilaabay sanadkii 2019 waxa ugu danbeyn madaxweynahu xadhiga ka jaray 22 June 2020. Dhinaca kale waxaa wasaaraddu ay si buuxda u qalabaysay labadan dhisme oo hada hawl-maalmeedkoodii lagu bilaabay.



**Dhismaha Waaxda Liisamada Iyo Buugaagta ee Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka**



Dhismaha Cusub ee Hayadda Horumarinta Wadooyinka



*Madaxweynaha JSL, oo xadhiga ka jaray 22 June 2020.*

### Mashruuca 4aad: Wadada Berbera Corridor

Dhismaha jidka isku xidhaya Berbera ilaa Wajaale (Berbera Corridor) ayaa waxaa si rasmiya loo bilaabay **10/05/2018**, waxaana Somaliland Ka caawiya Maalgalinta Waddada **Abu-Dhabi Development fund (UAE)**, waxaana fulinaysa Shirkada **NBHH**, waxaana la talin ka ah hayada **Conser (Consultant company)**.

**1 June 2020** waxaa si rasmiya Madaxweynaha Somaliland Mudane Muuse Biixi Cabdi u furay 12KM ee ugu horeeyay dhismaha wadada Berbera Corridor iyadoo intii ka danbeysayna la dhamaystiray **24 KM** oo cusub taas oo ka dhigaysa wadarta inta dhisan **36KM**.

Jidkani wuxuu kaga duwan yahay waddooyinkeenii hore dhinaca baladhka iyo dhinac xajmiga culayska uu qaadi karo waxaana laga dhigay baladhka **11.3** Miter halka markii hore ay ka aheyd 6.5 Mitter sidoo kale dhinaca xadiga culayska uu qaadi karo jidkaniwaa **40 Tones** halka markii hore ay wadadii hore u jirtay ay qaadeysay 6 Tones. Sida qorshuhu yahay jidkani wuxuu dhammaan doonaa **9 September 2021**.

Dhinaca kale dhismaha jidka waxaa garab socda dhismaha biriishka dacar- budhuq oo ka mid ahaa biriishyada ugu khatarta badan xiliyada roobabku da'ayaan.

Biriishkan oo dhararkiisu dhan yahay **105m** wax uu ka koobnaan doonaa **lix(6)Tiir**, waxaana qabsoomay hawlahaan soo socda.

1. Waxaa la shubay shubkii Cagta hoose ee Gidaarka kowaad (**abutment one**)
2. Waxaa la shubay shubkii Cagta hoose ee Tiirasha oo kala ah Tiirka kowaad, Tiirka labaad, Tiirka saddexaad iyo Tiirka Afraad (Casted Concrete footing of pier 1, 2, 3, and 4).
3. Waxaa lagaatay Birtii shubka gidaarka kowaad ee Biriishka (Fixed reinforcement bars for the wall of abutment one).
4. Waxa kale oo la taagay Birtii Tiirasha kala ah 1, 2, 3, and 4, waxa kaliya oo udhiman in shubkii lagu shubo.
5. Waxakale oo la xidhay birtii cagta hoose ee Tiirka shanaad (Fixing bars for the footing of pier five)
6. Waxa kale oo qodistiisa la dhamaystiray Cagta Tiirka lixaad. Waxaana la dhigay saydhsaydhkii hoose ee ka hooseyey cagta.
7. Waxa kale qodistiisa la dhamaystiray Gidaarka labaad ee bilowga biriishka (Excavating of Abutment).

8. Waxaa kale oo la dhamaystiray xidhxidhida birta **42 BIIM** oo midiiba dherarkeedu yahay 15m (**42 precast beams (15m long)** are ready for casting) waxaa kaliya oo ay sugaysaa in shubkii lagu shubo.

***Madaxweynaha JSL Mudane: Muuse Biixi Cabdi iyo Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka oo Xadhiga Ka jaraya Wadda Berbera Corridor.***



***Dhismaha 12km ee Wadada Berbera Corridor***




### Mashruuca 5aad: Dhismaha Jidka Hargaysa Bypass

Dhismaha jidka Hargeysa Bypass oo ka mida Mashruuca (Berbera Corridor) waxaa Somaliland Ka caawiya Maalgalinta dawlada **UK** waxaana fulinaysa Shirkada **COCC (China)** waxaana kormeeraysa Shirkada **KAGGA (Uganda)**.

Jidkan oo qayb weyn ka qaadan doonta yaraynta saxmada Gaadiidka caasimada, Waxa si hufan loo kala saaray shirkadihii soo xaraystay dhismaha wadada, sidoo kalena waxaa la dhamaystiray Lana diyaariyey dhulkii ay wadadu maraysay, waxaa kale oo la keenay qalabkii dhismaha wadada iyadoo loo diyaariyey kaamamkii la dhigayey qalabka.


Waxaana la Bilaabay Baneynta Dhulka iyo Calaamadeynta Wadadu Mareyso (**Road alignment, Demarcation, and Road Clearance**).



### Mashruuca 6aad : Dhismaha iyo Dhameystirka Biriishka Camuud

Wasaaradda Gaadiidka iyo H.Jidadku waxa ay si rasmiya u bilaawday Biriishka Camuud **24/10/2018**, halkaas oo uu Madaxweynaha JSL si rasmiya u dhagax dhigay, waxaana si rasmiya Madaxweynuhu xadhiga uga jaray **10/10/2020**.

Biriishkan oo dhararkiisu yahay **36 M**, Balaciisuna yahay **10.4M**, waxaa uu ka kooban yahay saddex kaabodood oo waaweyn iyo **1km** oo waddo laamiya, sidoo kale Biriishku waxa uu leeyahay **4 gidaar** oo midkiiba ka kooban yahay **52M** oo Difaac ah (**Protection**).



### Mashruuca 7aad: Dhismaha Jidka Lawyo-cado, Fardaha Ilaa Boorama

Daraasadda dhismaha jidka Lawyo-cado- Fardaha- Borama oo Somaliland ka caawiyey Maalgelintiisa Bangiga Horumarinta Afrika (**AFDB**) waxaana Qandaralaskii lagu samaynayay daraasada ku guulaysatay Shirkadda **Saba Engineering (Ethopian Co)**.

Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka, iyo Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka **Somaliland** iyo **African Development Bank** waxa ay si wadajir ah u bilaabeen **26 /09/2020** daraasada jidka lawyo-cado, Fardaha ilaa Boorama iyadoo la soo xulay shirkadii ku guulaysatay Samaynta Daraasadda Dhammaystiran, waxaana lagu dhamayn doonaa mudo dhan 18 bilood.



### Mashruuca 8aad: Qaybtii Labaad ee Gaadiidka Loo keenay Mashruuca Jidka Ceerigaabo-Burco ee Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka JSL

Wasaaradda Gaadiidka Iyo horumarinta Jidadka Somaliland iyada oo ka duulaysa baaxada hawsha iyo koobnaanta qalabka dhismaha wadada Ceerigaabo- Burco waxa ay ku guulaysatay in loo soo iibiyo qalab cusub si loo dardargaliyo shaqada waddada, isla markaan loo kordhiyo kaamamka shaqada oo markii hore ahaa **2 kaam** lana gaadhiisyo ilaa **5 kaam**. Waxaana loo soo iibiyey iyada oo raacaysa nidaamka iibsiga Macadaadka (**Machineries**) loo maro si waafaqsan **Xeer L/r 82/2018** xeerka Qandaraasyadda Qaranka iyo Siyaasada Gaadiidka Dawladda **2018** ee lagu ansixiyey kalfadhigii 22aad ee Golaha Wasiirada (**Qodobkiisa 3.1.2**) oo waafaqsan qaabka iibsiga gaadiidka dalka dibadiisa, Gaadiid kala duwan oo kala ah:-

S/N	Nuuga Gaadiidka	Tirada Gaadiidka
1.	Iskarogo	6
2.	Grader	2
3.	Roller	1
4.	Bulldozer D-8	1
5.	Booyado Shiidaal	3
6.	Booyad Biyo	1
7.	Karashar	1
8.	Daamur	11,790 xabo



*Madaxweynaha JSL Mudane Muuse Biixi Cabdi , Wasiirka Gaadiidka, iyo Madax kala duwan oo Kormeeraya Qalabka Cusub ee Wadda Ceergabo loo soo iibiyay*



### **Mashruuca 9aad: Jidka Hargeysa – Salaxley- Ina-Guuxaa**

Jidkan oo ka mid ah Jidadka ay Wasaaradda Horumarinta jidadka iyo bulshada Deegaanku iska kaashadaan, kuna jira barnaaminka xibiga kulmiye iyo Qorshaha horumarinta qaranka ee 2 aad NDP2 , waxay halbowle u tahay isku socodka dadka iyo ganacsiga isla markaana waxay isku xidhaysaa labbada dal ee Somaliland iyo Ethiopia, waxaanay maraysaa wajigii afraad, waxaa la hirgaliyey **33KM** oo caro kaawe ah mudadii sanadka ah ee u danbaysay.

Dhinaca kale wasaaraddu iyadoo ogsoon ahmiyada weyn ee wadada isku xidha Hargeysa – Salaxley-ina-Guuxaa waxay culayska saartay sidii loo dardar galin lahaa isla markaana dawladda iyo bulshadu isku kaashan lahayeen sidii loo dhamaystiri lahaa wadadan.

Wasaarada iyo Gudida wadadu waxay iska kaashadeen dayactirka qaybtii koowaad ee wadada oo dhamayd **34 KM** dayactir.



© Communication Office of the MoTRD, Somaliland.



Qalabka Wasaaradu ka hawl galisay Wadada isku xidha Hargeisa- Salaxley- Ina Guuxaa

### Mashruuca 10aad: Dhismaha iyo Qalabka Shaybaadhka Dhismayaasha iyo wadooyinka ee Qaranka

Wasaarada Gaadiida iyo H. jidadka iyo Hayada horumarinta waddoyinka iyagoo kaashanaya Hayada GIZ iyo Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF) waxay dayactir iyo qalabayn ku sameeyeen shaybaadhka dhismaha iyo wadooyinka, kaas oo u adeegi doona isla markaana lagu hubin doono agabka dhismaha oo kala ah Ciida, Jayga, sibidhka daamurka, sagbada iyo Birta. Shaybaadhkan waxaa loo qalabeeyey si waafaqsan qiimeynta caalamiga ah (**International Standard**).



Laabka Hay'ada Horumarinta Waddoyinka



*Madaxweynaha JSL Mudane Muuse Biixi Cabdi oo Furay Laabka Hay'ada Horumarinta Wadooyinka oo La qalabeeyey*

### Mashruuca 11aad: Jidka Hargeysa - baligubadle

Jidka Baligubadle-Hargeysa waxa uu ka mid yahay jidadka Wasaaradda iyo dadka deegaanku ay iska kaashadaan kana mid ah barnaamijka xisbiga Kulmiye iyo qorshaha horumarinta qaranka ee 2 aad.

Jidkan wuxuu halbowle u yahay isku socodka dadka iyo ganacsiga isla markaana waxuu isku xidhaysaa labbada dal ee Somaliland iyo Ethiopia. Wasaaradda Gadiidka Horumarinta Jidadka iyo shacabka deegaanka oo iskaashanaya waxay hirgaliyeen mudadii sanadkii u danbeeyey **28km** oo kala ah **3km** oo lakabkii labaad ah iyo **26 km** oo caro kaawe ah, sidoo kalena Wakaladda Horumarinta Wadooyinku waxay ku caawisay Qalab, Gaadiid iyo Shidaal ka hawlgala wadadaas dhismahaeda.



*Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka ,Agaasimaha Guud ee Wasaaradda , Iyo Gudiga Wadda Baligubadleh, oo kormeeraya dhismaha wadada halka uu marayo.*



***Qalabka Wasaaradu ka hawl galisay Wadada isku xidha Hargeisa- Baligubadle.***

**Mashruuca 12aad: Dhismaha Waddo 2 km ah oo isku Xidhi Doonta Hawdka Burco iyo Magaalada Burco.**

Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka oo kaashanaysa Hay'ada Horumarinta Waddooyinka Somaliland waxay ka qayb qaateen taageerida Dawladda Hoose ee Degmada Burco halkaas oo ay ka hirgaliyeeyn waddo **2km** ah gudaha Magaalada Burco. Waddadan oo horay Wasiirkii Hore u dhagax dhigay **bishii May 2017** ayaa waxa si rasmiya loo furay **20/07/2020**.



*Wadada Hawdka Burco ee Wasaaraddu Hirgalisay*

**Wasiirka oo Xadhiga ka jaray Waddo isku xidha Magaalada Burco iyo Hawdkeeda.**

**Mashruuca 13aad: Dhagax Dhiga Jidka Kala-Baydh ilaa Laascaanod**

Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka iyo bulshada deegaanka, ayaa si rasmi ah u dhagax-dhigay Jid dhererkiisu yahay **32km** oo isku xidhaya magaalooyinka Laascaanood iyo Kala-baydh ee Gobolka Sool. Wasaaradda Gaadiidka oo dhiirgalinaysa in bulshadu qayb ka noqoto dhismaha Waddooyinka ayaa waxay balanqaaday in kaalin muhiim ay ay ka qaadani doonto dhismaha waddadan, si la mid ah sida ay wasaaraddu taageero balaadhan uga siiso waddooyinka bulshadu ku dhiiratay inay dhistaan.



Wasiir Abdilahi Abokor Cismaan, Mareeyaha Hay'ada Horumarinta Waddoyink Ahmed Yusuf Mahamed, Gudoomiyaha Gobolka Sool, Maayirka Dagmada Laascaanood oo dhagax dhigay wadaddan



© Communication Office of the MoTRD, Somaliland.

*Jidka isku xidha Laascaanood iyo Kala Baydhka*

### Mashruuca 14aad: Dhismaha Wadada isku Xidha Laas-Caanod iyo Madaarka Laas Caanod

Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka iyo Hay'adda **TISS-PLUS**, iyo Golaha Deegaanka ee Degmada Laascaanood ayaa xadhigga ka jaray furitaanka waddo dhererkeedu dhan yahay **5km** oo isku xidhaysa garoonka Diyaaradaha Laascaanood iyo magaalada Laascaanood. Waddadan oo ahmiyad wayn u leh isku xidhka Magaalada iyo Madaarka waxaa si rasmiya xadhiga looga jaray **3 March 2020**.



*Wasiir Ku xigeenka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Sahal Mahamed, Mareeyaha Hay'ada Horumarinta Waddoyinka Ahmed Yusuf iyo Gudoomiyaha Gobolka Sool oo Xadhiga Ka jaray waddo isku xidha Magaalada iyo Madaarka Laascaanood.*



*Wadada isku xidha Magaalada Lascaanod iyo Madaarkeeda.*

### **Mashruuca 15aad: Dayactirka Waddooyinka Dalka**

Mudooyinkii u danbeeyey waxa Hayadda Horumarinta Waddooyinka (RDA) ku hawlanayd dayactirka waddooyinka iyo Biriish yada dalka kuwaas oo **6 bilood** ee u danbeeyey hawshoodu socotay waxaana ka mida dayactirka wadada Gebiley, kala-baydh, dayactirka wadada Jaamacada Camuud iyo dayactirka biriish ka Camuud

- A. **Dayactirka Jidka Gebiley-kala baydh:-** waxay Hayada Waddooyinku dayactir ku samaysay Jidka isku xidha Gebiley iyo kala baydh taas oo burbur xoogani ka muuqday isla markaana dhibaato wayn ay ku qabeen gaadiidka u kala goosha Somaliland iyo Ethiopia taas oo ay hayadu dayactir ku samaysay isla markaana aad ugu reeyeen Gaadiidkii isticmaali jiray.
- B. **Dayactirka Wadada Jaamacada Camuud:** - waxaa dayactir buuxda lagu sameeyey wadada jaamacada camuud taas oo dhererkeedu dhan yahay **1km** waxaana dhamaan la saaray ama laga dhigay roog taas oo baahi wayn ay u qabeen Gaadiidka isticmaali jiray

maadama ay oo ay tahay wadadii jaamacada loo marayey oo ay marwalba gaadiid kale duwan isticmaali jireen

- c. **Dayactirka Jidka Berbera –Burco:** waxaa la gebo gabeeyey dayactirka wadada isku xidha Berbera iyo burco taas oo gaadiidka dhib badan ku qabeen.
- D. **Dayactirka Jidka Burco-Laasanoood:** waxaa hada la gebo-gabo ku dhaw dayactirka wadada isku xidha Burco iyo Laasanoood taas oo hada shaqadeedii gebo -gabo tahay





***Wasiirka Gaadiidka, Badhasaabka Gobolka Togdheer, Maayirka Degmada Burco, iyo Shaqaalaha dayac-tirka wadda Burco-Laascaanod***



### **Mashruuca 16aad: Dayactirka Jidka Geel-doora ee Gobolka Sanaag**

Jidkani wuxuu ka mid yahay kaabayasha dhaqaalaha kuwa ugu horeeya, hadaba si loo dardar galiyo dhismaha iyo dayactirka Jidkani waxay Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta jidadku dayactir ballaadhan ku sameysay dhismaha jidka isku xidha Geel-doora ilaa Laascaanood waxaanay dayactiray **50KM** oo ka mida, Jidkan oo aan in muddo ah wax hawl ah laga qaban, si kor loogu qaado isku socodka iyo ganacsiga gobolada bariga Somaliland.

Dayactirka wadadan waxaa fulisey shirkada **SANCOC Construction Company** oo wasaaradu u igmatay.

### **Mashruuca 17aad: Dhismaha Jidka Xargaga ilaa Dhumay**

Wasaaradda iyo shirkada **Ahmed Suudi Company** oo fulinaysay dhismaha Jidka Xargaga ayaa dhammaystiray **30KM** oo ka mid ah.

Ka dib markii wasaaraddu aragtay baahida loo qabo Jidkan iyo hawsha ay u baahan tahay in laga qabto waxay wasaaraddu bilowday hirgelinta iyo dhismaha Jidkan oo kaalin mug leh ka qaadanaaya isku socodka gobolada iyo degmooyinka dalka.

### Mashruuca 18aad: Tababarka Injineerada Dawladaha Hoose ee Dalka.

Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka iyo Hay'adda Horumarinta wadooyinka waxay Tababar u qabteen Injineerada Dawladaha Hoose ee Dalka, Kuwaas oo Mudo Shan maalmood Ah Tababar uga socday Magaalada Hargeisa Halkaas oo Lagu Tababarayey Hab-raacyada iyo Hanaanka loo marayo Dhismaha Wadooyinka (**Training of Technical Standard Manuals and Specifications For Roads**)



### Mashruuca 19aad: Diyaarinta Gaadiidka Wacyi- gelinta Covid19

Wasaaraddu waxay si buuxda uga qayb qaadatay xakamaynta iyo la tacaalida xanuunka safmarka ah ee **Covid19** waxayna gudida heer qaran ku wareejiyay Gaadiid dhan **62**, oo ay wasaaradu ka soo ururisay wasaaradaha iyo hayadaha kala duwan ee dawlada, kuwaas oo ka qayb qaadatay wacyigelin balaadhan oo laga sameeyey dalka oo dhan. Sidoo kale wasaaraddu waxay qayb laxaad leh ka qaadatay fulinta Awaamirta gudida heer qaran ee ka hortaga Caabuqa **COVID19**, kuwaas oo kala ahaa in gaadiidka dadweynaha ee u kala goosha dalka gudihisu aanay qaadi Karin in ka badan tiradda dadka loo xadiday si looga feejig naado faafida Caabuqaas.

Sidaas darteed wasaaraddu waxa ay kaantarooladda dhigtay shaqaale ka tirsan oo hawshaas fulinayey.



**Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka oo Gudiga Xakameynta COVID19 ku Wareejiyey Gaadiidka Wacyi Galinta**



*Gaadiidka loogu Talo Galay in ay ka qayb qaatan wacyi galinta COVID19*

### Mashruuca 20aad: Qalabaynta Hoostada Gaadiidka Hargeysa.

Sida ku cad qorshaha sannadka **2020** wasaaradu waxay si buuxda u qalabeysay hoostada dayac-tirka Gaadiidka dawladda gaar ahaan gobolka Maroodi-jeex. Hoostadani waxay u adeegi doontaa dhamman Gaadiidka dawladda si loogu dayac-tiro isla markaana kor loogu qaado badqabka iyo ilaalinta Gaadiidka dawladda oo wasaaraddu u xil saaran tahay.

**22 June 2020** kii ayuu Madaxweynaha Somaliland xadhiga ka jaray hoostada Gaadiidka dawladda.



*Madaxwaynaha JSL Mudane Muuse Biixi Cabdi oo booqday Hoostada Gaadiidka Dawladda oo Dib u Habeyn iyo Qalabeyn Lagu Sameeyey.*

### Mashruuca 21aad: Qalinjabinta Dufcadii Koowaad ee Darawalinta Dawladda iyo Bixinta Liisamada Cusub ee Dawladda


Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka iyada oo Fulinaysa Siyaasadda Gaadiidka Dawladda waxay Xaflad Qalinjabin ah u Qabatay Qayb ka Mid ah Darawaladda Dawladda oo Tababar ku qaadatay Iskuulka Tababarka Wadayaasha iyo Macalimiinta Wadayaasha

Sidoo kale waxaa la gudoonsiiyey darawalada dawladda Liisanka Cusub ee Wadayaasha Gaadiidka Dawladda in ka badan **81** Darawal oo Ka Qalinjabiyeey iskuulka Tababarka Wadayaasha iyo Macalimiinta Wadayaasha ee Wasaaradda Gaadiidka Iyo Horumarinta Jidadka.

Agaasimaha guud ee Wasaarada gaadiidka, **Cumar Sayid Cabdilaahi Adan** ayaa

Gudoonsiiyay darawaladii qalin jabiya liisanka wadista gaadiidka dawlada oo ah mid si casri ah oo la sameeyay oo leh xog kaydiye (**Data-Base**).


Jamhuuriyadda Somaliland  
Wasaaradda Gadiidka &  
Horumarinta Jidadka




Republic of Somaliland  
Ministry of Transport &  
Roads Development

## Xafladda Dhamaystirka Tababarka Darawaliinta Dawladda

### *Dufcadii 1<sup>aad</sup>*



**Goobta: Hoolka Xarunta Gaadiidka**  
**Taariikhda: 30 June, 2020**





***Darawaliinta Ka Qalin Jabiyey Iskuulka Tababarka Darawalinta Dawladda Iyo Malimiinta Darawalinta oo La gudoonsiyey Liisanka Cusub ee Dawladda***



***Xaflada Qalin Jabinta Darawaliinta Dawladda ee Ka baxay Iskuulka Tababarka Darawalinta Dawladda Iyo Malimiinta Darawalinta***

### Mashruuca 22 aad: La Soo Wareegida Qalabka Daabacada iyo Liisamada Shirkada GTS

Madaxweynaha Somaliland ayaa wareegto ku soo saarey in gacanta dowladda lagu soo celiyo adeegyada ay qabato shirkada **GTS**. Guddi Farsamo oo ka kooban Wasaarado kala duwan, Xafiiska Xisaabaadka Qaranka iyo Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland, ayaa qiimayn ku sameeyay qalabka iyo dhaqaalaha ay Shirkadda gaarka ah ee GTS (Global Technology Solutions) ku maalgelisay adeegyada samaynta buugaagta iyo liisanka dhaqdhaqaaqa Gaadiidka oo ay kala shaqayn jirtay Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Somaliland.

Guddiga Farsamo oo uu hogaaminayay agaasimaha guud ee Wasaaradu Cumar Sayid Cabdilaahi Aadan ayaa safaro kala duwan ku soo maray dhamman goboladda dalka iyagoon soo sameeyay qiimayn shaqaalaha iyo qalabka ay shirkadu ku shaqeynaysay waxayna warbixintii safarkooda la wadaageen Guddiga Wasiirada. Ugu danbeyntii waxay Wasaaraddu si rasmiya ula soo wareegtay qalabkii, shaqadii, iyo shaqaalihii shirkadu gacanta ku haysay.



***Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Cumar Cabdilaahi Aden oo Gudominayay Gudiga Farsamada ee Loo xil-saaray La soo Wareegida Liisamada iyo Buugaagta.***

**Mashruuca 23aad: Furitaanka Xafiiska Buugaagta iyo Bileedhada Lumey (One Stop Shop)**

Wasaaradda Gaadiidka iyo H.Jidadka iyo Wasaaradda H. Maaliyada ayaa si wadda jir ah u hirgaliyey xarunta Wasaaradda Gaadiidka xafiis loogu magac daray xafiiska buugaagta iyo bileedhada lumey, xafiiskana oo lagu hubin doono , xafiiskan oo bulshadu baahi weyn u qabtay waxaa ka wada hawl gali doono Wasaaradda Maaliyada, Ciidanka Nabad Galiyada Waddooyinka, iyo Wasaaradda Gaadiidka si loogu fududeeyo bulshadu adeega ay saddexda xarumood ee dawlada uga baahdaan oo wakhi baddan kaga lumi jiray.



**Wasiirka H.Maaliyada, Wasiirka Gaadiidka, Wasiir Kuxigeenka Wasaaradda H Maaliyada iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gaadiidka Iyo H. Jidadka**

### Mashruuca 24aad: Mishiinada Daabacada liisamada iyo Buugaagta ee Gobolada

Si loo fudaydiyo adeegyada wasaaraddu bixiso ee ay ka midka yihiin liisamada iyo buugaagta loona gaadhsiiyo gobolada dalka oo dhan waxa ay Wasaaradda Gaadiidka iyo H.Jidadku gaadhsiiyay qalabka daabacada gobolada Sool, Saaxil, Sanaag, Togdheer, Awdal.

Dhamman Gobolada dalka oo dhan waxa ay u soo safri jireen looguna daabici jiray Gobolka Maroodi-jeex taas oo mudo badan ku qaadan jirtay in muwaadiniintu helaan liisanka iyo buuga dhaqdhaqaaqa gaadiidka. Dhammaan qalabka waxaa laga maal galiyey cashuurta muwaadinka.



*Xafiiska Gobolka Sool oo la dhigay qalabka daabacada liisamada iyo Buugaagta*



*Xafiiska Gobolka Sool oo la dhigay qalabka daabacada liisamada iyo Buugaagta*

### Mashruuca 25aad: Hirgalinta Liisamada Bajaajta

Xog uruurin badan oo wasaaraddu samaysay waxaa lagu ogaaday in gaadiidka bajaajtu tahay gaadiid ku soo badanaya dalka isla markaana khatartiisu sii kordhayso, khatartaas oo ay keenayaan wadayaasha bajaajta oon masuuliyad iyo xirfad ku filan u lahayn isla markaan aan la weydiin wax liisan ah, sidaas darteed wasaaradu waxay go'aamisay in loo sameeyo liisamo sidoo kalana laga qaado imtaxaano ugaar ah ku waas oo lagu kala ogaan karo masuuliyada wadaha iyo xirfadiisa, sidoo kale waa markii u horeysay ee liisamo loo sameeyo bajaajta

### Mashruuca 26aad: Qalinjabinta Dufcadii Labaad ee Darawalinta Dawladda

Wasaarada Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka iyadoo Fulinaya siyaasada Gaadiidka Dawladda ee lagu ansixiyey Kalfadhigii **22aad**, Golaha Wasiirada waxay wasaaraddu furtay Iskuulka Tababarka Wadayaasha iyo Macalimiinta Wadayaasha oo Sanadkii 2019kii, waxaana ka qalinjabiyey mudadii uu furnaa labba dufcadood oo ka mid ah darawaliin Gaadiidka ah kuwaas oo tiradoodu dhan tahay **135**.






***Wasiir ku xigeenka wasaaradda Gaadiidka iyo H. Jidadka iyo agaasimaha guud ee Wasaaradda Warfaafinta oo gudoonsiinaya shahaado sharaf iyo liisanka cusub ee gaadiidka dawladda***

### **3Mashruuca 27aad: Diyaarinta Database Ka Shilalka**

Wasaaradda Gaadiidka oo kaashaneysa ciidamada Nabad Galyada Waddoyinka waxa ay ka Hirgelisay sidii kor loogu qaadi lahaa nidaamka xog uruurinta shilalka Gaadiidka. Nidaamkan cusubi waxa uu Fududaynayaa in xili kasta la heli karo xogta shilalka Gobollada Dalka. Wasaarada Gaadiidka waxa kale oo ay ciidamada nabad galyada wadooyinka kala shaqaysay sidii ay ku heli laahayen xogta Gaadiidka dalka xili kasta.



**User Login**

User Name

Password

Remember password

**SIGN IN**

CAR ACCIDENT MANAGEMENT SYSTEM

Maamul

Dashboard  


---

 INTERFACE  
 Accidents  
 Users  


---

 ADDONS  
 Reports  
 Profile  
 Logout

### Dashboard

Xogta oo hab boqollay ah

Shilalka	2%
Reports (Warbixinaha)	2%
Darawalada liisan-ka leh	1%
Darawalada Aaan liisanka lahayn	0%

2

Istimaalayaasha

2

Reports

2

Shilalka

1

Darawalada liisan-ka leh

0

Darawalada bilaa liisanka- ah

## Mashruuca 28aad: Dib U Eegista iyo Wax-kabadalka Buuga Imtaxaanka Liisamada

Sida uu qeexayo Qodobka **57aad**, farqadiisa 1aad ee Xeerka Waddo Marista Somaliland Xeer **Lr.56/2013**, waxaa reeban in Gaadiidka la kaxeeyo liisan la'aan.

Sidaa daraadeed Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka JSL waxa ay diyaarisay Buug ka kooban **11 Cutub** oo kala duwan, kuwaas oo loogu talo galay in qofka doonaya in uu qaato liisanka wadida gaadiidka uu marka hore fahmo ama barto shuruucda iyo qawaaniinta u dejisan hannaanka wadida gaadiidka ee caalamiga ah.

Buugga waxa loogu talo galay in qofka ka gudbaa uu helo liisanka, sidoo kale waxa uu helayaa aqoon ku filan oo taabanaysa dhinacyada kala duwan ee xirfadda dirawalnimada, hadday tahay kaxaynta iyo maamulka gaadhiga laftiisa iyo hadday tahay shuruucda calaamadaha waddooyinka ee Caalamiga ah iyo waxii kale ee ku saabsan taxadirka iyo feejignaanta looga baahan yahay darawalka wanaagsan.



Madbacadda Qaranka JSL

**WASAARADDA GAADIIDKA  
& HORUMARINTA JIDADKA**

Balamaha imtaxaanka kala xidhiidh Lanbaraddan.  
Telesom:2037 – Somtel:398

JAMHUURIYADDA REPUBLIC OF  
SOMALILAND SOMALIAND



# BUUGA

## IMTIXAANKA LIISAMADA GAADIIDKA SOMALILAND


( Daabacaadii labbaad ) ( Second Edition )



[www.somalilandtransport.com](http://www.somalilandtransport.com)

## Mashruuca 29aad: Dib U Habeynta Qaab Dhismeedka Hay'adda Horumarinta Waddoyinka.

Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadku waxa ay sameysay Daraasad lagu qiimeynayo qaab dhismeedka iyo hanaanka shaqo socodsiinta ee Hay'adda Horumarinta Waddooyinka JSL, waxaa lagama maarmaan noqotay in lagu sameeyo dib u qaabeyn (**Structural Review**) si loo hirgeliyo Siyaasadda Dawladda Ee Dhinac Maamul Wanaag Iyo Daadajinta Shaqooyinka.



## Mashruuca 30aad: Diwaan Gelinta Hantida Wasaarada

Xafiiska hanti-dhawrku waxaa uu diwaan geliyay dhammaan hantida magurtada ah ee wasaarada iyo Hay'adda Horumarinta Jidadka iyada oo la raacaayo siyaasada cusub ee Hantida qaranka lagu maamulaayo (fixed asset management policy.) iyo PFM (public financial management)

Nidaamkan cusubi waxaa uu ogolaanayaa in item kasta uu yeeshaa sumad ugaara oo lagu garan karo haddii loo baahdana si fudud lagu heli karo, si fududna looga saarikaro markay dhaqan ka bax noqdaan, sidoo kalena wiixii agab cusub la soo ee la soo iibiyana si automatic ah ugu biiri karaan hantidii hore ee diwaan gashana.

